Taliska Mareykanka ee Afrika

# War-Saxaafadeed

*Bogga: [www.africom.mil](http://www.africom.mil)*

**WAR DIXIN DEG DEG AH** June 4, 2021

## Warbixinta Qiimaynta Khasaaraha Shacabka ee Taliska Mareykanka ee Afrika

Taliska Maraykanaka ee Afrika ayaa waxaa soo gaaray war bixin ku saabsan waxyeelada shacabka, taas oo la qaado sanadkiiba 3 jeer kuna eg Mar. 31, 2021. Taliska Maraykanka ee Afrika ayaa waxaa soo gaaray labo warbixin oo cusub kuna saabsan waxyeeleeynta soo gaadha shacabka, iyadoo la xiray labo kamid ah sadex kiis oo furnaa. Tani waa warbixintii shanaad ee qiimeeynta wax yeelada shacabka ilaa iyo markii Taliska Afika uu bilaabay shaacinta warbixinada ku saabsan waxyeelaynta shacabka ilaa bishii April 2020. Taliska Maraykanaka ee Afrika waxaa ka go'an kordhinta la xisaabtanka iyo daahfurnaanta.

Intii lagu guda jiray qiimeeynta afarta sadex jeer sanadkiiba, Talisku waxaa uu eegay labo warbixin oo ku saabsan waxyeelaynta shacabka soo gaadha. Mid kamid ah kiisaska wuxuu ku jiraa dib u eegis. Waxaa intaa dheer, wuxuu Talisku qabtay shir jaraa'id oo ay ka soo qeeyb galeen 7 kamid ah hay'adaha aan dawliga ahayn si looga wada hadlo hawsha ku saabsan waxyeelaynta soo gaadha dadka shacabka ah.

Taliyaha guud ee ciidamada Maraykanaka, Gen. Stephen Townsend ayaa waxaa uu yiri, "Waa lama huraan inaanu si daahfuran uga run sheegno warbixinada ku saabsan qasaaraha soo gaara dadka shacabka ah. Wuxuu ku daray, "Waxaanu sii wadi doonaa dib u eegista hanaanka warbixineed si aanu u hubino in saaxiibadayo iyo guud ahaan shacabku ogaadaan sida ay nooga go'antahay hoos u dhigida waxyeelada dadka shacabka ah."

Talisku waxaa uu sii wadayaa raadinta xal kasta oo xoojinaya in la helo daahfurnaan iyo wada tashi.

Korneelka Ciidanka Cirka ee Maraykanka, ahna madaxa arimaha bulshada ee Taliska Afrika Col. Christopher Karns ayaa yiri, "Taliska Marakanka ee Afrika waxaa uu ku faraxsanyahay fursada wada xaajood ee ku salaayasan xogwareeysiga iyo daacadnimada ee dhex maray anaga iyo Hay'adaha aan dawliga ahayn. Waxaa uu raaciyay, "Wada hadaladaani waxay siinayaan fursad Taliska Afrika isfaham bulsho iyo qaab ay uga dheeraan karaan wax kasta oo keeni kara qasaare shacab una sahli kara Taliska Maraykanka ee Afrika inay helaan fursado ay kor ugu qaadaan hawlgalada iyaga oo cidna wax ku noqon meel kasta oo ay rabaan.

Sii wadida culeeysyada ka dhanka ah ururka argagixisada ee Alshabaab iyada oo la adeegsanayo habab kala duwan ayaa waxay muhiim u tahay danaha dawladaha Somalia iyo Maraykanku ay ka leeyihiin sugida amniga ee gobolka.

Taliyaha Taliska Afrika Townsend ayaa waxaa uu yiri, “Al-Shabaab waxay Somalia ka fuliyeen weeraro iskugu jira ismiidaamin iyo ficilo argagixisnimo, oo ay ka mid ahaayeen bartilmaameedyo ay dhawaan ku qaadeen hogaamiyayaasha Ciidanka Danab. Sidoo kale waxay barakiciyeen kumaakun qooysas shacab ah iyaga oo adeegsanaya qaraxyo iyo olole argagisnimo.” Intaa waxaa u ku daray, “Maraykanku waxaa uu sii wadi doonaa taakuleeynta saaxiibadayo iyo ka hor taga isku dayga falalka argagixisada Al-Shabaab.”

---

**Taliska Maraykanka ee Afrika iyo Hay’adaha aan Dowliga Ahayn oo Ka Wada Hadlaya Khasaaraha Soo Gaadha Dadka Rayidka ah.**

Bishii March 4-teedii ee 2021, Taliska Maraykanka ee Afrika ayaa waxaa uu lakulmay 7 Hay’adood oo ah kuwa aan dowliga ahayn iyagoo ka wada hadlay dadaal socday oo la xariira habka iyo nidaamka sidii looga hortagi lahaa, looga fogaan lahaa, loona qiimeeyn lahaa waraka ku saabsan wax yeeleeynta dadka shacabka ah. Iyo in la helo isfaham wanaagsan oo dhex mara Taliska Afrika iyo Hay’adaha aan dowliga ahayn xalna loo helo walaac kasta oo ku saabsan geedi socodaka Taliska Maraykanka ee Afrika.

Wadaxaajoodka ayaa waxaa kamid ahaa kaqeybgalayaal ka socday howlwadeenada Taliska Mareykanka ee Afrika kuwaas oo si toos ah ugu lug leh la shaqeynta arrimaha waxyeelada rayidka. Dood badan kadib waxay siisay Hay’adaha aan dawliga ahayn siisay fursad ay ku aqoonsadaan oo ay ku siiyaan talooyin ku saabsan hagaajinta geedi socodka Taliska Mareykanka ee Afrika. Taliska Mareykanka ee Afrika ayaa ka munaashaqoonaya talooyin badan oo ka soo baxay la kulanka Hay’adaha.

**Farqiga u dhexeeya Qiimaynta Khasaaraha Dadka Shacabka ah ee Taliska Mareykanka ee Afrika iyo Warbixinnada Hay’adaha Aan Dowliga ahayn.**

Qiimeynta Taliska Mareykanka ee Afrika ayaa lagu sheegay warbixinada ku saabsan khasaaraha rayidka soo gaara in ay mararka qaar ka duwanyihiin kuwa Hay'adaha, oo ay ku jiraan Hay’adaha aan dowliga ahayn, sababo badan awgood. Macluumaadka taliska wuxuu ku saleysan yahay ilo sirdoon ah oo xadidan iyo warbixino howlgaleedyo qarsoodi ah oo aysan shacabku heli Karin sida ay u dheceen. Tani waxay muujinaysaa farqiga u dhexeeya natiijooyinka taliska iyo kuwa kale hee Hay’adaha.

---

**Qeexitaanka "Khasaaraha Shacabka iyo Dagaal"**

Iyadoo la waafajinayo Sharciga Wasaaradda Difaaca ee Buugga Dagaalka, "Rayid iyo dagaalyahan" waxaa lagu qeexaa sidaan soo socota:

**Rayid**: Dadka aan dagaalka ku jirin oo aan ka mid ahayn (askari /ciidamada amniga ama xubno ka tirsan xoogag cadow ku dhawaaqay ama koox hubaysan oo abaabulan oo ka tirsan kooxo hubeysan). Dadka rayidka ah waxay waayi karaan xuquuda rayidnimo hadii ay muujiyaan ujeedo cadaawadeed, ama ay ku kaca fal cadowtinimo, ama waqtigaas oo ay si toos ah uga qeyb qaataan dagaalada. Inkastoo ay mar kale fursada rayidnimo dib u heli karaan hadii ay joojiyaan dhaqanka la sheegay, ama hadii ay noqdaan dhaawac, jiradaan, xabsi galaan, ama is dhiibaan, sidaa darteedna aysan awoodin inay sii wadaan dhaqankaas.

**Dagaal**: Dadka sida tooska ah uga qaybqaata isku dhaca hubaysan, ama dadka falalkooda cadawtinimada leh ay si ula kac ah u taageeraan cadowga ka dhanka ah shakhsiyaadka Mareykanka. Sidoo kale shaqsiyaadka ka hawlgala ama ka qeeyb noqda qayb ka mid ah kooxa

hubaysan oo aan ka tirsanayn Ciidamada Dawladda ama dagaal ku qaada Ciidamada Dawladda ayaa laga yaabaa in laga dhigo bartilmaameed, maxaa yeelay waxay isku mowfiq yihiin oo isku ujeedo yihiin cadowga lala dagaalamayo.

---

**Warbixinta ama Natiijooyinka ku saabsan Qiimaynta Khasaaraha Rayidka ee Saddexdii biloodba mar ee uu aruuriyay Taliska Afrika ee Mareykanka oo Kooban.**

Warbixintani waxay ka tarjumaysaa natiijooyinka qiimaynta khasaaraha rayidka ee horey loo soo sheegay inay furan yihiin haddase xidhan ama wali ku jira qiimayn, iyo warbixino ku saabsan suurtagalnimada waxyeelo loo geeystay dad rayid ah oo talisku helay intii lagu jiray muddada warbixinta. Macluumaad kasta oo la xiriira kiis ama rayid lawaxleeyay oo hadda socda ama la xiray dib ayaa loo eegi doonaa si loo go'aamiyo haddii macluumaadka cusubi wax ka beddelayo qiimeynta. Waxaana lagu dari doonaa warbixinta soo socota ee khasaaraha rayidka ee saddexdii biloodba marka ah.

---

**Qiimeyntii oo dhameystiran**

**Xusuusin**: Meelaha ay ku qorontahay “lama xaqiijin” ama aan lagu cadeeyn warbixinta ku saabsan waxyeellada dadka rayidka ah waxay ka dhigan tahay inaysan jirin macluumaad ku filan oo lagu xaqiijiyo ama lagu caddeeyo warbixinnadaas. Marka macluumaad cusub la helo, warbixin ku saabsan khasaaraha dadka rayidka ah, ayaa dib loo qiimeyn doonaa. Ilaa ay taasi dhacdo, qiimeyntaan waxaa loo aqoonsanayahy inay tahay mid dhameystiran.

1. (Lama xaqiijin) Janaayo 19, 2021, Taliska Mareykanka ee Afrika wuxuu helay hal (1) warbixin laga soo xigtay ilo warbaahineed oo internetka ah oo sheegaya in hal (1) qof oo rayid ah lagu dilay duqeyn Mareykanku ka geystay nawaaxiga Jamaame, Soomaaliya, Jan. 19, 2021. Dib u eegis kadib, warbixinta waxaa lagu qiimeeyay mid aan la xaqiijin. Weerarkii cirka ee dhacay Janaayo 19, 2021 waxaa lagu bartilmaamsaday taliye ka tirsan al-Shabaab oo ahaa isku dubbaridaha weerarada ka dhanka ah ciidamada saaxxibada aanu nahay ee gobolka. Warbixino badan oo sirdoonka Mareykanka ah, oo la soo uruuriyay muddo dhowr sano ah, ayaa lagu xaqiijiyay in shaqsigaasi uu ahaa taliye ka tirsan Al-Shabaab. Weerarka cirka wuxuu ka dhacay goob banaan ah oo saameynta shaqo joojinta ay ku ekeyd shaqsiga la bartilmaameedsaday iyo gaariga uu watay.

2. (Lama xaqiijin) Febraayo 28, 2020, Taliska Mareykanka ee Afrika wuxuu helay saddex (3) warbixin oo laga helay ilo-wareedyo warbaahinta internetka oo sheegaya in labo (2) qof oo rayid ah lagu dhaawacay duqeyn Mareykanku ka geystay nawaaxiga Kuunyo Barroow, Soomaaliya, Febraayo 28, 2020. Dib u eegis kadib, warbixinta waxaa lagu qiimeeyay mid aan la xaqiijin. Weerarka cirka ee dhacay 28-kii Febraayo, 2020 waxaa lala beegsaday labo (2) xubnood oo ka tirsan al-Shabaab. Dib u eegis oo balaaran iyo falanqeyn lagu sameeyay sirdoonka duqeynta kadib ayaa la xaqiijiyay in xubnaha la bartilmaameedsaday ee al-Shabaab ay ahaayeen kuwa kaliya ee waxyeelada soo gaartay.

**Dhacdooyinka Furan**

1. Jan. 2, 2021, Taliska Mareykanka ee Afrika wuxuu helay hal (1) warbixin laga soo xigtay ilo warbaahineed oo internetka ah oo sheegaya in saddex (3) qof oo rayid ah lagu dhaawacay duqeyntii Mareykanka ee agagaarka Kuunyo Barroow, Soomaaliya, 1-dii Janaayo. 2021. Qiimaynta Taliska Mareykanka ee Afrika ee warbixintan waa socon doontaa.